

DAAWADA LA SIIYO ARDAYDA DUGSIGA

Daawooyinka waxa la siin doonaa inta lagu jiro saacadaha dugsiga ee ay lagamamaarmaan tahay. Wuxaan dhiirigelineynaa jadwallada qiyaasta ee u oggolaanaya in daawada la qaato kahor iyo kadib dugsiga. Marka ay taasi suurtogal noqon weydo, shaqaalahaa Adeegyada Caafimaadku waxay raaci doonaan tilmaamaha hoos ku qoran marka ay daawada ku siinayaan ilmahaaga dugsiga. Mararka qaarkood, qof aan ahayn kalkaalisaada dugsiga ayaa laga yaabaa inuu daawo siiyo ilmahaaga (tusaale, xilliyada qadada safarrada dibadda, iwm.). Shaqaalahaa wuxa tababbari doona oo hagi doona kalkaaliye

TILMAAMAH DAAWADA

1. Foomka Ogolaanshaha Daawada waa in la buuxiyaa oo uu saxeexaa waalidka/masuulka ee loogu talogalay dhammaan daawooyinka lagu bixiyo dugsiga. **Dawooyin dhacay lama bixin doono.**
2. Dhammaan dawooyinka dhakhtarku qoray waa inay lahaadaan calaamadda uu ku lifaaqay farmasiga/dhakhtarka. Tani waxaa ku jira daawo kasta oo neefta ah oo dugsiga loo soo qaato. Calaamadda waa in lagu dhejiyaa daawada neefta ama daawada neefta waa in lagu dhex ridaa sanduuq ay ku lifaaqan tahay warqadda daawada.
3. Dhammaan daawooyinka aan dhakhtar qorin "la qaadan karo dhakhtar la'aan" waa in lagu soo diraa galka asalka ah.
 - Magaca ilmuuhu waa inuu ku dul yaal galka daawada.
 - **Kaliya tilmaamaha ku qoran galka daawada ayaa la raacayaa ilaa uu dhakhtarku ku codsado (qoraal ahaan) tilmaamo kala duwan oo lagu siinayo daawada.**
4. **Isbeddel** kasta oo ah wakhtiga ama qiyaasta daawada dhakhtarku qoray waa inay la socotaa codsi qoraal ah oo ka socda dhakhtarka.
5. Waxaa lagu talinayaa in daawo ku filan hal (1) toddobaadkii ama ka yar la keeno dugsiga "hadba sida loo baahdo" daawooyinka dhakhtar qoray ilaa sodon (30) maalmood agabyada ayaa la aqbali doonaa daawooyinka maalinlahaa ah ee la qorsheeyay
6. Shaqaalahaa Adeegyada Bulshada waxay la shaqayn doonaan, ardayga, waalidka iyo macalinka si loogu dhiiri galiyo masuuliyada ardayga inay si joogta ah u yimaadaan xafiiska caafimaadka wixii daawo ah.
7. Haddii ardaygu ku hoos jiro daryeel dhakhtar oo uu awoodo in uu iskii usu siiyo daawada neefta ama anafalaksis, waalidka ama masuulka ardayga waa in uu la xiriiro kalkaalisaada dugsiga si ay u hesho waraaqaha looga baahan yahay iyo Qorshe Caafimaad oo ku haboon
8. **Daawooyinka waa in AAN loo soo dhiibin carruurta baska saaran.** Waalidiinta/masuulka waa in ay dawooyinka keenaan xafiiska caafimaadka ee dugsiga, kadibna ka qaataan dawooyinka aan la isticmaalin marka uu xanuunku dhammaado, ama dhammaadka sannad-dugsiyedka
9. Dugsiga Degmada Park Hill wax dawo ah ma siiyo ardayda. Tani waxaa ku jira daawooyinka sida asbirin, Tylenol, dhibcaha qufaca, cabudh yareeyayaasha, kiriimka qoraxda iyo daawada laabjeexa.

Magaca Ardayga:	Magaca daawada:
Qiyaasta:	Waqtiga lagu siinayo dugsiga:
Ogaanshaha ama xaalad u baahan daawadaan:	
Tilmaamaha gaarka ah:	

Waan akhriyay oo fahmay tilmaamaha daawaynta ee sare. Wuxaan sidoo kale fahamsanahay inaan mas'uul ka ahay inaan soo qaato daawooyinka aan la isticmaalin kahor dhammaadka sannad-dugsiyedka, ama waa la tuuri doonaa si waafaqsan siyaasadaha iyo nidaamyada Park Hill.

Saxeexa waalidka/masuulka: _____ Taariikhda: _____